

Waa maxay ESTA?

ESTA waa howlgal 24x7 ah oo leh shaqaale 500 ka badan, oo adeegyo siiya shan malyan oo reer Victoria ah. Adeegyadaas waxaa ka mid ah siinta qabashada wicitaanka Saddexda Eber (000) iyo adeegyada gudbinta:

- Boliiska Victoria Police (Metropolitan Melbourne iyo degaanka Greater Geelong)
- Ambalaaska Victoria (Metropolitan Melbourne)
- Dab-demiska Metropolitan Fire Brigade (The Metropolitan Fire District)
- Country Fire Authority (Dowlad-goboleedka oo dhan)
- Victorian State Emergency Service (Dowlad-goboleedka oo dhan)

Haddii aad u baahan tahay caawimaad degdeg ah, waxaad wacdaa Saddexda Eber (000)

Wicitaanka Saddexda Eber (000) waxaa la wici karaa markii loo baahan yahay boliis, dab-demis ama ambalaas ee xaalad naf-halis ku jirta ah ama xaalad adag.

Tusaalooyinka qaarkood e degdegga waxaa ka mid ah:

- Shilalka hawada, tareenka ama biyaha
- Falcelis aleerjiko ah oo keenaya neefsi la'aan
- Dhiig-bax (daran)
- Neefsiga oo adkaada (tusaale, asmada daran)
- Sonkorowga hooseeya (diididda / isdaba-marka / isku-darsanka)
- Iska badinta daroogada
- Hafashada
- Shoogga korantada / gubashada / shilalka warshadaha
- Shilalka qaraxa ama bambooyinka
- Dabka halista ku ah nafta iyo hantida
- Wadnaha oo joogsada (ama laga shakiyey)
- Shilalka wadooyinka
- Xanuunka caloosha (oo daran)
- Istaroogga (ama laga shakiyey)
- Qof meel ku xidhmay
- Jir-dil (dhaawac)
- Qof suuxay
- Rabshadda (dagaalka / muran qaylada leh / rabshada qoyska)

Xusuusnow, haddii aadan hubin inay arintu tahay mid degdeg ah ama aysan ahayn, iska wac shaqaalaheena oo ah dad u tababaran inay ku caawiyaan.

Marka la wacayo Saddexda Eber, xusuusnow inaad:

- Isdeji
- Si qeexan u sheeg HALKA degdeggu yahay
- Si qeexan u sheeg WAXA degdeggu yahay
- Su'aalaha qofka qabanay wicitaanka uga jawaab intii suurtagal ah oo aad awoodo
- Ha isa saarin taleefanka ilaa sidaas kugula taliyo qofka qabanay wicitaanka
- Iska ilaali khatarta ku dhici karta adiga iyo dadka kaleba (tusaale: fiilooyinka korantada wadada ee go'ay marka shil ka dhaco wadada, dadka dagaalamaya, dhinbilaha ka soo boodaya dabka).